# *Soo Koobida Tilmaanta Waxbarshada Gaarka ah ee Barashada Shakhsi ahaaneed: Guga 2021*

Ujeedada ilahan ayaa ah in dib loo eego tilmaamaha iyo talooyinka la siinayo iskuulada iyo qoysaska ee ku saabsan shaqsi ahaan in loo siiyo adeegyada waxbarashada gaarka ah dhammaan heerarka fasallada, dugsiga barbaarinta illaa da'da 21. Dukumeentigaani wuxuu ku furmayaa dib u eegista tilmaanta, wuxuu ku xigaa liistada hubinta qorshaynta, wuxuuna ku xirmayaa qaar ka mid ah tixraacyada ilaha ee la xiriira.

## Soo Koobid timaanta ee loogu talagalay Bixinta Adeegyada Ardayda Naafada ah ee dhamaan Qaababka Waxbarista

Qaybtani waxaa loogu talagalay inay bixiso soo koobitaanka xusuusinta muhiimka ah oo ka socota Su'aalaha iyo Jawaabaha: Bixinta Adeegyada Ardayda Naafada ah Inta lagu gudajiro COVID-19 si ay uga caawiso degmooyinka iskuulada buuxinta shuruudaha Disabilities Education Act (Xeerka Waxbarashada Shakhsiyaadka Naafada ah, IDEA) ee loogu talagalay Free Appropriate Public Education (Waxbarshada Dadweynaha ee ku Habboon ee Bilaashka ah, FAPE) ee dhamaan Qaababka waxbarista. Tixraacyada tooska ah ee Su'aalaha iyo Jawaabaha ayaa lagu xusay sanduuqyo shay kasta ka dib.

### Qiimaynta iyo U qalmitaanka

- Degmooyinka waa inay hubiyaan in la sii wado nidaamka shaqaalaha iyo waalidiinta si loo bilaabo gudbinta qiimaynta waxbarashada gaarka ah ee dhammaan noocyada waxbarista markay qabaan walaac ku saabsan ardayga (yacni, raadinta ilmaha). (E-5)
- Degmooyinka ayaa sii wadaya mas'uuliyadda ka saaran bixinta FAPE, dhammaystirka qiimeynta iyo IEP-yada, iyo ka-wareejinta ardayda Qaybta C illaa Qaybta B marka la gaaro sannad-guurada dhalashadooda saddexaad. (E-6)
- Go'aannada u baahan oggolaanshaha qoraalka ah ee waalidka (sida oggolaanshaha qiimeynta hore), oggolaanshaha lagu bixiyo iimeel ama adeegsiga habab kale ayaa loo tixgeliyaa inay yihiin oggolaansho qoraal ah illaa iyo inta waalidka lagu wargelinayo oo uu fahamsan yahay dhammaan macluumaadka la xiriira hawsha ogolaanshaha loo raadinayo. (E-3)
- Haddii ardaygu ka qaybqaadanayo barashada dhanka intarneetka ama mida iskudhafan wakhtiga qiimaynta hore ama dib u qiimaynta la sameeyay, kooxda qiimaynta waxay u baahan karaan inay aad ugu tiirsanaadaan xogta taalla, khaasatan haddii taxaddarrada caafimaadka iyo badqabka ay xaddidayaan awoodda degmada inay bixiso qiimaynta casriyaysan ee shakhsi ahaaneed. (E-5)
- Haddii loo baahdo waqti dheeri ah si loo dhammaystiro qiimeynta, degmada iyo waalidiinta ayaa laga yaabaa inay isku waafaqaan in la kordhiyo waqtiga 35-ta maalmood ah.[1] Kordhinta waa in la diiwaangeliyo, oo ay ku jirto taariikhda la filayo in la dhammaystiro iyo sababta dib u dhaca. Taxadar waa in la sameeyaa, si kastaba ha noqotee, si loo hubiyo in waqtiga loogu talagalay aan la kordhin, iyadoo la tixgelinayo dib u dhaca adeegyada lagama maarmaanka ah inay ku yeelan karto saameyn xun ardayga. (E-1)

---

[1] Waxaa muhiim ah in la ogaado in mudada 35-maalin dugsiyeed ee lagu dhammaystirayo qiimaynta marka la helo ogolaanshaha waalidka la kordhin karo, muddada saddexda sano ah ee dhammaystirka dib u qiimaynta iyo muddada sannadka ah ee dhammaystirka IEP lama kordhin karo.

Washington Office of Superintendent of PUBLIC INSTRUCTION

- Wixii tilmaamo dheeri ah oo ku saabsan dhameystirka qiimeynta bilowga ah, dib u qiimeynta, iyo kala-guurka Qeybta C ilaa B inta lagu guda jiro safmareenka COVID, tixraac sidoo kale tilmaanta qiimeynta inta lagu gudajiray COVID oo ay sameeyeen Ururka Dhaqaatiirta Cilmi-nafsiga Iskuulka ee Gobolka Washington (WSASP). (E-4)

## Horumarinta iyo hirgelinta IEP

- Ma jiraan wax ka reeban shuruudaha si loo siiyo FAPE ardayda naafada ah, maadaama degmadu ay siinayso adeegyo waxbarasho guud ardayda aan naafada ahayn, markaa waa inay sidoo kale siisaa FAPE ardayda naafada ah. (B-1)
- Adeegyada Individualized Education Program (Barnaamijka Waxbarashada Shakhsiyeed, IEP) waa in la gaarsiiyo inta ugu badan ee suurtogalka ah [2] inta lagu jiro safmareenka guud ahaan noocyada waxbarista, oo ay ku jiraan qaababka gudbinta dhanka intarneetka ama midka isku dhafan haddii loo baahdo si loo waafajiyo tilmaamaha caafimaadka/badqabka ee gobolka iyo deegaanka. (A-1)
    - Ardaydu maahan inay lahaadaan hoos udhaca adeegyada IEP ee sanadlaha IEP-yada, marka laga reebo kiisaska xaddidan (tusaale, ka dib qiimeyn muujineysa in adeegyadu aan loo baahneyn mar dambe, kooxda IEP waxay go'aaminayaan in waxbarid gaaban laakiin aad u xoogan (sida 1:1) la siin doono, iwm). (D-2)
    - Kooxaha IEP waa inay diiwaangeliyaan gundhigga go'aamada si wax looga beddelo wixii adeeg ah ee ku saabsan IEP, sida qaybta heerarka hadda la joogo ama ogeysiiska hore ee qoraalka ah. (D-2)
    - Adeeg kasta oo dib loo eegay oo waalidku doorto inuusan helin, waa in lagu diiwaangeliyaa ogeysiis qoraal ah oo hore (PWN). Xulashada waalidiinta si ay u helaan qaar, laakiin aan ahayn dhammaan, adeegyada uu ardaygu u qalmo waa inaan lagu khaldin waalidku inuu kala noqnayo oggolaanshaha adeegyada. (D-2)
- Maaddaama degmooyinku ay hirgeliyaan noocyada waxbaridda (shaqsi ahaan, iskudhaf ama dhanka intarneetka) iyadoo la waafajinayo tilmaamaha caafimaadka iyo badqabka, haddii adeegyada ardayga loo fidin doono sida ku cad IEP-ga hadda jira (oo ay ku jiraan tirada waqtiga iyo goobta), wax-ka-beddelka IEP looma baahan karo. (D-1)

## Bixinta Adeegyada

- Inay jirto maahan amar guri joogitaan oo dhaqangalay oo uu soo rogay gobolku ama degmada, degmooyinku lagama mamnuucin inay si shakhsi ahaan ah u bixiyaan adeegyada waxbarashada ee ardayda naafada ah, xitaa haddii degmadu go'aansato inay siinayso oo keliya waxbarashada dhanka intarneetka ardaydeeda guud. Degmooyinka waxaa la xasuusinayaa inay tixraacaan tilmaamaha hadda jira ee loogu talagalay waxbarashada shaqsi ahaaneed ee Waaxda Caafimaadka ee Gobolka Washington. (A-3)
- Ma jirto hal wado oo adeeg lagu bixiyo. Degmooyinku waa inay go'aamiyaan, iyagoo la kaashanaya qoysaska, qaababka ay adeegyadooda u siinayaan ardaydooda isla markaana ay shaqsiyan uga dhigaan adeegyadan iyada oo ku saleysan baahida ardayga u gaarka ah. (A-2)
- Iskuullada degmadu waxay go'aamin doonaan heer deegaan heerka shaqsi ahaan, khadka intarneetka, ama adeegyada fogaan araga la heli doono, iyada oo la tixgelinayo caafimaadka, badqabka, iyo baahida sinnaanta ee ardayda qaata waxbarashada gaarka ah iyo kordhinta kamid ahaanshaha. (A-1)

---

[2] Marka loo eego30 20 U.S.C. § 1401(9)(D), IDEA waxay qeexaysaa waxbarashada guud ee bilaashka ah ee haboon (FAPE) oo ah adeegyo "lagu bixiyo si waafaqsan IEP."

- Waxaa lagu talinayaa in degmooyinku ay waafajiyaan gaarsiinta adeegyada waxbarashada gaarka ah qaabka guud ee adeega waxbarashada la fulinayo, iyadoo go'aannada shaqsi ahaaneed la gaarayo si wax looga qabto waxbarashada sida gaarka ah loo qaabeeyey iyo helitaanka goobaha waxbarashada guud iyo tilmaamidda (A-1)

### Ka mid noqoshada iyo Xaddidaadda ugu Yar ee Bay'ada

- Ardayda naafada ah waa inay ku qaataan waqtiga ugu badan ee ku habboon goobta waxbarashada guud, gaar ahaan marka la eego xaddidaadda kala fogaanshaha bulshada iyo shuruudaha kale ee caafimaadka iyo badqabka. Waxbariddu waa in la waafajiyaa si loo daboolo baahiyaha ardayga halkii la fiirin lahaa baahiyaha, ama awoodda jirta, ee degmada. (A-1)

## Ka taagerida Ardayda si ay ugu noqdaan waxbarashada shakhsi ahaaneed

- Guud ahaan noocyada waxbaridda, iskuulada iyo nidaamyada waa inay ka faa'iideystaan khibradda habdhaqan ee shaqaalahooda si ay u taageeraan waxqabadyada daboolaya baahiyaha ardaydooda iyo jawiga cusub ee waxbarashadda iyo in mudnaanta la siino baahiyaha degdegga ah ee ardayda ugu saameynta badan. (A-2) Degmooyinka waxaa lagu dhiirigelinayaa inay la shaqeeyaan qoysaska iyo shaqaalaha si loo aqoonsado loona taageero ardayda laga yaabo inay u baahdaan waxqabadyo habdhaqan oo dheeri ah si ay u taageeraan ku soo noqoshada waxbarista shakhsi ahaaneed iyo rajooyinka laga qabo jawiga waxbarasho ee cusub (tusaale ahaan xirashada qalabka ilaalinta shakhsi ahaaneed (PPE), u dulqaadashada isbeddelada jadwalka, u gudbida goobta dugsiga muuqda, kordhinta ka qeybgalka iyo feejignaanta joogtada ah).
- Ardayda qaar waxay ubaahan karaan habayn dheeri ah oo lagu daro IEP-gooda si ay u taageeraan u gudbida waxbarashada qofka. (A-1) Degmooyinka waa inay sidoo kale tixgeliyaan baahida loo qabo in la siiyo ardayda oo dhan helitaanka hoy guud (sida helitaanka meel banaan oo aamusan ama maaskaro badqab ah, kordhinta wada xiriirka dugsiga iyo guriga, nasashada iyo/ama hawlaha gaagaaban) si loo taageero intay kala qabsanayaan oo ay la jaan qaadayaan waxyaabaha laga filayo maalin dugsiyeedka shakhsi ahaaneed. Taageerooyinkan guud iyo kuwa kumeelgaarka ah uma baahna in lagu daro IEP illaa kooxda IEP ay go'aamiso in loogu baahan yahay si joogto ah iyada oo qayb ka ah dalabka ardayga ee FAPE.
- Haddii ardaygu uusan helin fursadaha iyo adeegyada waxbarasho ee la heli karay inta lagu jiro COVID-19, OSPI waxay ku talineysaa in degmadda diwaangeliso xiriirayada badan ee qoyska iyo isku dayga wax looga qabanayo caqabadaha helitaanka. (A-1) Degmooyinku waa inay had iyo jeer isku dayaan inay dib ula hawlgalaan qoysaska isla markaana ay u fidiyaan adeeg bixin debecsan iyo taageerooyin sida ugu macquulsan.
- Ardayda iyo qoysaska qaarkood waxay u baahan karaan taageero dheeri ah si ay ugu laabtaan waxbarashada shakhsi ahaaneed. Degmooyinka waa inay ku taageeraan qoysaska fahamka taxaddarrada caafimaadka iyo badqabka ee la qaadayo, khayraadka la heli karo iyo sida loo heli karo iyo tixgelinta baahida loo qabo tababarka waalidka iyo waxbarashada si looga caawiyo waalidiinta inay taageeraan dib ugu laabashada ardaygooda iskuulka.

## Liistada Qorsheynta ee Ku Noqoshada waxarashada Shakhsi ahaaneed

Liiskan hubinta qorshaynta waxaa loogu talagalay inuu ka taageero degmooyinka bixinta adeegyada waxbarashada gaarka ah markay u gudbayaan hirgelinta waxbarashada shakhsi ahaaneed.

### Xidhiidhada

- ☐ Qor oo u dir xiriirka balaaran ee degmada ee ku saabsan badqabka iyo adeegyada.
- ☐ Qor oo u dir ogeysiis qoraal ah qoysaska dhammaan ardayda naafada ah ee beddelaya noocyada waxbarashada (shakhsi ahaan, iskudhafan ama fogaan arag) si loogu wargeliyo nidaam kasta-bixinta adeeg balaaran iyo / ama badelista jadwalka ee saamaynaya dhamaan ardayda. Ogeysiiskan qoraalka ah waa inuu u gudbiyaa waalidiinta adeegyada ku qoran IEP-yada ardayda ee noocyada waxbaridda oo dhan.

### Nidaamka Qiimeynta & U qalmitaanka

- ☐ Isku dubaridka kooxaha iyo qoysaska si loo go'aamiyo sida iyo goorta qiimeyntu lagu dhammeyn doono mudada loo baahan yahay.
  - Dib u eeg heerka gudbinta ee qiimeynta waxbarashada gaarka ah,
  - Dib u eeg heerka ay hadda marayaan qiimaynta bilowga ah ee hawshu socoto,
  - Dib u eeg heerka ay hadda marayaan qiimaynta bilowga ah ee hawshu socoto, iyo
  - Sii qorsheyso dib-u-qiimeynta soo socota bilaha soo socda.
- ☐ Wadashaqeyn la yeelo early intervention provider agency (hay'adda bixisa wax ka qabadka hore, EIPA) ee maxaliga ah iyo qoysaska la hubiyo kala guurka waqtiga ku habboon, go'aaminta u qalmitaanka, iyo horumarinta IEP iyo hirgelinta ardayda ka gudbaya Qaybta C ilaa Qaybta B.
- ☐ Haddii loo baahdo waqti dheeri ah si loo dhamaystiro qiimeynta, la xiriir qoyska si aad u diiwaangeliso kordhin lagu sameeyo mudada 35-ka maalin ah.

### Nidaamyada IEP

- ☐ Dib u eeg jadwalka fasalka iyo jadwalka bixinta adeegyada ee dhammaan ardayda naafada ah.
- ☐ Qorsheyso in adeegyada lagu bixiyo si waafaqsan IEPs, oo ay ku jiraan ardayda laga yaabo u baahdaan kulamada IEP iyo/ama wax ka beddelka IEP, oo ay ku jiraan tixgelinta gaadiidka. Waxaad tixraacdaa [Least Restrictive Environment (macluumaadka ugu yar ee xaddidaadda deegaanka, LRE) ee daaradaha xaalada] ee loogu talagalay wixii macluumaad iyo tusaalooyin ah.
- ☐ Isku dubarid qoysaska si loo go'aamiyo jadwalka, adeegyada, shirarka, iwm.
- ☐ Dib-u-eegis ku Samee Behavior Intervention Plans (Qorshooyinka Waxka-qabadka Dhaqanka, BIP) ee shakhsi ahaaneed si loo hubiyo in ardayda ay helaan wax ka qabadka hab-dhaqankooda iyo in wax ka qabadka hab-dhaqankoodu uu la jaanqaadayo bay'ada waxbarashada, rajooyinka iskuulka iyo baahida ardayga soo koradhay.
- ☐ Cusbooneysii nidaamyada aruurinta, isku dhafka, iyo wadaagida xogta la socoshada horumarka ee ardayda iyo waalidiinta si waafaqsan IEP.
- ☐ Mudnaanta sii qorshaynta waayeelka iyo ardayda jirsanaya 21 sano, oo ay ku jiraan High School and Beyond Plans (Dugsiyada Sare iyo Qorshooyinka Kadanbe, HSBPs), dariiqooyinka qalin jabinta, isku xirka hay'adaha, iwm.

## Nidaamka Maamulka Waxbarashada

- ☐ Sii wad inaad dib u eegto oo aad cusbooneysiiso Learning Management System (Nidaamka Maamulka Waxbarashada, LMS) ee degmada si loo hubiyo inay buuxiso baahiyaha helitaanka ardayda iyo qoysaska dhamaan noocyada waxbarida.
- ☐ Dib u eeg oo cusbooneysii habraacyada si aad si joogta ah u baarto shaqsiyaadka ardayda ah hoy siinta iyo dib u habeyn loo baahan yahay oo hubi in ardayda ay heli karaan kuwan sida ku cad IEP.

## Shaqaalaynta iyo Jadwalka

- ☐ Dib u qaabee jadwalka shaqaalaha si loogu gudbo adeegga shaqsiyeed ee loo dhan yahay
- ☐ Waqti u qoondee wada shaqaynta shaqaalaha iyo qorshaynta meelaha ay ka kooban yihiin oo dhan.

## Kaqeybgalka Ardayda iyo waxbarashada Bulshada & Shucuurta

- ☐ Dib-u-eegis ku samee nidaamyada baaritaanka guud si loo hubiyo inay ka mid yihiin oo ay la jaanqaadayaan baahiyaha ardayda naafada ah ee u gudbaya waxbarashada shakhsi ahaaneed.
- ☐ In la horumariyo nidaamyada degmada iyo dhismaha si loo ururiyo, loo falanqeeyo, loona dhexgalo ardayda iyo iyo dhisida xogta ka qeybgalka heerka dhismaha, oo ay kujirto hanaan lagu taageerayo shaqsiyaadka ardayda ah iyo qoysaska leh kaqeyb galinta noocyada waxbarida oo dhan.

## Ilaha la xiriira

### Tilmaamaha Waxbarashada Gaarka ah ee Federaalka

- Qeybta B Hirgelinta Bixinta Adeegyada IDEA ee COVID-19 hada jira Bay'ada dukumeentiga su'aasha iyo jawaabaha (Sebteembar 28, 2020)

### Tilmaamaha Waxbarashada Gaarka ah ee OSPI

- Dib u furista Dugsiyada Washington 2020: Tilmaanta Waxbarashada Gaarka ah iyo saaxiibTilmaamaha Qorsheynta Waxbarashada Gaarka ah iyo https://www.k12.wa.us/sites/default/files/public/specialed/pubdocs/Summary_Reopening_WA_Schools_SpEd_Guidance.pdf
  (oo lagu heli karo luuqado kala duwanhalkan)
- Su'aal iyo jawaabo: Bixinta Adeegyada Ardayda Naafada ah Inta Lagu Jiro COVID-19 ee Xagaaga 2020
- Tilmaamaha Furitaanka Waxbarashada Gaarka ah: JAWIGA UGU XAYIRAADA YAR (LRE) Daraasada Kiiska

### Tilmaamaha kale ee Gobolka

- Waaxda Caafimaadka ee Gobolka Washington Iskuulada K-12-Dayrta 2020–2021 Tilmaanta o Waaxda Caafimaadka ee Gobolka Washington Go'aanka Bixinta Waxbarshada shakhsi ahaaneed ee Ardayda K-12 ee dhigta Dugsiyada Dadweynaha iyo kuwa Gaarka ah Inta lagu jiro COVID-19 Safmareen

### Khayraad dheeri ah

- Khayraad dhanka Khadka intarneetka (iyo kuwa khadka intarneetka ahayn) oo lagu taageerayo Barashada Joogtada ah ee Ardayda Naafada ah (XLSX)
- Professional Development Opportunities for Supporting Students with Disabilities (XLSX) (Fursadaha Horumarinta Xirfadeed ee Taageerida Ardayda Naafada ah (XLSX))
- Taxanaha Tababarka Waalidka, Taageerida Akhlaaqda Wanaagsan ee Bay'ada Guud: Qaybta 1aad, Qaybta 2aad iyo Qaybta 3aad
- Siminaarada la duubay ee Waxbarshada Gaarka ah ee sanad dugsiyeedka 2020 - 21
- 8 Talooyin ku saabsan in Manhajka Tusmada laga dhigo mid Laheli Karo (ugu fiican ku furmay Chrome)